

Macluumaad ku saabsan Waajibaadka ku saaran oo ah Wadashaqaynta iyo Natiijada ay leedahay wadashaqayn la'aanta sida uu tilmaamayo 1. Buugga Sozialgesetzbuch (SGB 1)

Qofkii codsada ama qaata Daryeelka Bulshada, waa in uu hawshaas ka qayb qaataa intii tabartiisa ah, marka la xaqiijinayo waxyaalaha uu codsaday sida uu tilmaamayo qodobka § 60 SGB I.

Waxaa taas kamid ah in aad Run ka sheegtid wax walba oo ku saabsan shakhsiyadaada iyo xagga dhaqaalahaba, sidoo kale inaad soo sheegtid isbadall kasta oo ku yimaada waxyaalaha aad hadda kahor soo gudbisay ayadoon lagu waydiinin una soo gudbisid sidii ugu dhakhsaha badan. Fadlan lasoo xiriir Qofka ku qaabilsan, xataa haddaad is leedahay, isbedelka ku yimid Xaaladaha adiga shakhsi ahaan kugu saabsan iyo wixii xagga dhaqaalaha ku saabsanba inay Raad wayn ku lahayn caawitaanka aad heshid.

Waa Waajib ku saaran, in aad keento Caddayn marka lagu waydiiyo kadib, wax kasta oo xaqiijinaya in aad xaq u leedahay Daryeelka aad codsatay, sidoo kale in aad waxwalba si cad u faahfaahisid, una soo gudbisid ama aad ogolaatid in aan u gudbino ama aan horgayno Arrimahaaga qof sadexaad.

Si Go'aan sax ah looga gaaro Daryeelka aad codsatay oo ah ALG II/ Sozialgeld(Lacagta lasiiyo qofka intuu shaqo ka helayo) waxaa loo baahanyahay inaad keento warqadda ku lifaaqan tan Dokumintiyada ku qoran. Saa darteed waxaa lagaa codsanayaa, Waajibaadka ku saaran oo ah Wadashaqaynta sida uu tilmaamayo qodobka § 60 SGB I inaad u hogaansantid iyo Wakhtiyada lagu qabto oo aad timaadid ama aad soo sheegtid intuu kaa dhicin Wakhtigii lagu qabtay kahor sababta aadan u imaan karin. Haddaad seegto Wakhtiga lagu qabtay, waxaa markaa dhici kara in lagaa jarto wixii Dhaqaala ahaa oo aad qaadan jirtay, ayada oo aan baaritaan dheeraad ah lagu samayn, ama waxaa lagu diidi karaa Arji cusub oo aad dalbatay sababtuna tahay wadashaqayn la'aanta sida uu tilmaamayo qodobka (§66 SGB I). Soo celinta Dhaqaalaha/ Go'aanka hore waxaa inta badan la bilaabaa, wakhtiga aad bilowdid in aad si dhamaystiran oga soo baxdid Waajibaadka kusaaran oo ah Wadashaqaynta sida uu tilmaamayo qodobka (§ 67 SGB I).

Waxaan kaloo ku ogaysiinaynaa, in Arjiga Oggolaanshaha oo ku salaysan warbixin been ah oo aad sheegtay ama warbixin aan dhamaystirnayn oo aad dhiibtay inay taasu tahay Sharci darro. Saa darteed Dhaqaalaha aad sharci darrada ku qaadatay waa inaad soo celisid waxaa kaloo lagaala noqonayaa Arjiga Oggolaanshaha oo aad horay u haysatay. Sidoo kale waxaa lafiirinayaa, Arrintaas dhacday darteed in lagu dacweeyo khiyaanada aad samaysay darteed.

Waan fahmay Macluumaadka kor lagusoo xusay waana aqoonsaday.

Taariikhda

Saxiixa Qofka Arjiga codsanaya